# Guudmarka Faa'iidooyinka

Willamette Dental

SEIU Premium Employers Plan A – WA172 – 8/1/2025

| FAA'IIDOOYINKA LA DABOOLO | COPAY-YADA |
|---|---|
| Ugu badnaan sanadkii | Ma jiro ugu badnaan sanadkii* |
| Lacagta la iska jaro | Lacag la iska jarayaa ma jirto |
| Booqashada xafiiska ee guud & ortho | Waxaad bixinaysaa $0 booqasho kasta |
| **ADEEGYADA WAX OGGAANSHAHA & KA HORTAGA** | |
| Baaritaannada caadiga ah & degdega ah | Lagu daboolo copay-ga booqashada xafiiska |
| Raajatada | Lagu daboolo copay-ga booqashada xafiiska |
| Nadiifinta ilkaha | Lagu daboolo copay-ga booqashada xafiiska |
| Daaweynta fluoride | Lagu daboolo copay-ga booqashada xafiiska |
| Dahaarida ilkaha (ilig kasta) | Lagu daboolo copay-ga booqashada xafiiska |
| Baaritaanka kansarka madaxa iyo qoorta | Lagu daboolo copay-ga booqashada xafiiska |
| Tilmaamaha nadaafada afka | Lagu daboolo copay-ga booqashada xafiiska |
| Jaantuska iliga hareerihiisa 'periodontal' | Lagu daboolo copay-ga booqashada xafiiska |
| Qiimeynta iliga hareerihiisa 'periodontal' | Lagu daboolo copay-ga booqashada xafiiska |
| **DIB U HAGAAJINTA ILKAHA** | |
| Buuxinta | Lagu daboolo copay-ga booqashada xafiiska |
| Kabida ilkaha birta ah | Waxaad bixinaysaa $250 oo copay ah** |
| **RAKIBAADA ILKAHA MACMALKA AH 'PROSTHETICS'** | |
| Ilkaha sare ama hoose ee macmalka ah oo dhammeystiran | Waxaad bixinaysaa $400 oo copay ah** |
| Birta iliga lagu xiro 'bridge' (ilig kasta) | Waxaad bixinaysaa $250 oo copay ah** |
| **DAAWEYNTA GUDAHA ILKAHA 'ENDODONTICS' & HAREERAHA ILKAHA 'PERIODONTICS'** | |
| Daaweynta buuxinta salka gawska 'root canal'- gudaha | Waxaad bixinaysaa $85 oo copay ah |
| Daaweynta buuxinta salka gawska 'root canal'- bicuspid | Waxaad bixinaysaa $105 oo copay ah |
| Daaweynta buuxinta salka gawska 'root canal'- gawska | Waxaad bixinaysaa $130 oo copay ah |
| Qalliinka ciridka 'osseous' (afartii qaybood ee kasta) | Waxaad bixinaysaa $150 oo copay ah |
| Qorsheynta xiddidka ilkaha (afartii qaybood ee kasta) | Waxaad bixinaysaa $75 oo copay ah |
| **QALLIINKA AFKA** | |
| Saarida ilkaha ee caadiga ah (hal ilig) | Lagu daboolo copay-ga booqashada xafiiska |
| Qalliinka soo saarida iliga | Waxaad bixinaysaa $100 oo copay ah |
| **DAAWEYNTA TOOSINTA ILKAHA 'ORTHODONTIA'** | |
| Daaweynta toosinta ilkaha ka hor 'pre-orthodontia' | Waxaad bixinaysaa $150 oo copay ah*** |
| Daaweynta toosinta ilkaha oo dhammeystiran | Waxaad bixinaysaa $2,500 oo copay ah** |
| **ILKO BEERISTA** | |
| Qalliinka ilko beerista | Faa'iidada ilko beerista ugu badnaan $1,500 jadwal sanadeedkiiba |
| **WAXYAABAHA KALA DUWAN** | |
| Adeega suuxdinta | Lagu daboolo copay-ga booqashada xafiiska |
| Kharashyada shaybaarka ilkaha | Lagu daboolo copay-ga booqashada xafiiska |
| Nitrous Oxide | Waxaad bixinaysaa $40 oo copay ah |
| Booqashada xafiiska ee gaarka ah | Waxaad bixinaysaa $30 booqasho kasta |
| Lacag isku soo celinta daryeelka degdega ah ee ka baxsan degaanka | Waxaad bixisaa kharashka ka badan $250 |

*Faa'iidooyinka TMJ, qalliinka ilko beerista, iyo qalliinka sixida daamanka 'orthognathic' waxay leeyihiin faa'iidada ugu badan, haddii caymiskooda la bixiyo. **Ilko beerista-ay taageerayaan qalabka macmalka ah ee la isu rakibo 'prosthetics' (kabida ilkaha 'crowns', biraha ilkaha lagu xiro 'bridges', iyo ilkaha macmalka ah) ma aha faa'iido caymiskeeda la bixiyo. ***Copay-ga ayaa lagu daraa copay-ga Daaweynta Orthodontia ee Dhammeystiran haddii bukaanku aqbalo qorshaha daaweynta.

**Waxaa maalgeliyay Willamette Dental of Washington, Inc.**

Kuwa la soo bandhigay kaliya waa qaar ka mid ah nidaamyada caafimaad ee la maro ee lagu daboolo qorshahaaga. Shahaadada daboolida caymisku waxay ka kooban tahay sharraxaada dhammeystiran ee faa'iidooyinka la daboolo iyo copay-yada.

# Wax iska reebida iyo Xaddidaadaha

Willamette Dental

Tani kaliya waa soo koobid. Shahaadada daboolida caymisku
waxay ka kooban tahay sharraxaada dhammeystiran ee Wax iska reebida iyo Xaddidaadaha.

**WAX ISKA REEBIDA**

- Beerista lafaha 'grafting'.
- Biraha ilkaha lagu xiro 'bridges', kabida ilkaha 'crowns', ilkaha macmalka ah, ama qalabka macmalka ah ee la isu rakibo 'prosthetic' ee u baahan taariikho daaweyn oo badan ama qalab la isku xidho 'fittings' haddii shayga ah prosthetic la isku rakibay ama lagu bixiyay ka badan 60 maalmood ka dib joojinta caymiska.
- Dhammeystirka ama bixinta daaweyn ama adeegyo la sameeyay ama la bilaabay ka hor taariikhda dhaqangalka caymiska.
- Ra'yi ururinta Cone beam CT X-rays iyo habka tomographic-ka.
- Ilko beerista-ay taageerayaan ilkaha macmalka ah 'prosthetics' ama birta ilkaha lagu xiro 'abutment'-ay taageerayaan ilkaha macmalka ah 'prosthetics' (kabida ilkaha 'crowns', biraha ilkaha lagu xiro 'bridges' iyo ilkaha macmalka ah).
- Beerista ilkaha oo qalliin ahaan la isku galiyay ka hor taariikhda dhaqangalka caymiska ee qofka xubinta ah ee aanan helin dib u hagaajintii u dambeysay ama beerista ilkaha oo loogu talagalay daaweynta ilkaha aasaasiga ah ama ku-meel-gaarka ah.
- Daaweynta daaweynta gudaha ilkaha 'endodontic' oo la dhammeystiray in ka badan 60 maalmood ka dib joojinta caymiska.
- Eposteal, transosteal, endodontic endosseous, ama beerista ilkaha ee yar.
- Baaritaannada ama la tashiyada loo baahan yahay ee kaliya la xiriira adeegyada aan u qornayn in ay yihiin kuwo la daboolayo.
- Adeegyada tijaabada ama baaritaanka ah iyo baaritaanka la xiriira ama la tashiyada.
- Dib u dhiska afka ee buuxa, oo ay ku jiraan dib u hagaajinta afka ee ballaaran ee leh kabida ilkaha 'crowns', biraha ilkaha lagu xiro 'bridges', ama beerista ilkaha; iyo dib u soo kabashada halka ilkuhu iska taabtaan daanka 'occlusal rehabilitation', oo ay ku jiraan kabida ilkaha 'crowns', biraha ilkaha lagu xiro 'bridges', ama beerista ilkaha oo loo isticmaalo ujeedada ah kabida 'splinting', wax ka beddelka cabbir toosan ee ilkaha 'vertical dimension', dib u hagaajinta habka wax qaniinka ilkaha 'restoring occlusions' ama sixitaanka qaab-dhismeedka ilkaha 'attrition', xoqida ilkaha 'abrasions', ama nabaad guurka.
- Daryeelka isbitaal is dhigista oo ka baxsan xafiiska ilkaha oo loogu talagalay nidaamyada qalliinka ilkaha, adeegyada dhakhaatiirta, ama kharashyada xarunta.
- Dayactirka, hagaajinta, beddelaada, ama dhammeystirka ilko beeris hadda jirta oo uu bilaabay ama uu galiyay adeeg bixiye aan wax ka qayb qaadanayn iyada oo aan is gudbin laga helin Willamette Dental Group, adeeg bixiyaha P.C.
- Dayactirka, hagaajinta, beddelaada, ama dhammeystirka ilko beeris hadda jirta oo la bilaabay ama la is galiyay ka hor taariikhda dhaqangalka caymiska ee qofka xubinta ah.
- Adeegyada prosthetic ee wajiga 'maxillofacial'.
- Qalabka ilkaha 'nightguards'.
- Qalliinka sixida daamanka 'orthognathic', aan ka ahayn in uu ugu qoran yahay heshiiska in uu yahay mid caymiskiisa la daboolayo.
- Dib u hagaajinta shakhsi ahaaneed.
- Qalliinka balaastikada ah, dib wax loogu dhisayo, ama qalliinka is qurxinta iyo adeegyada kale, ee inta badan loogu talagalay in lagu wanaajiyo, beddelo, ama kor loogu qaado muuqaalka.
- Daawooyinka la isku qoro iyo daawooyinka meel kasta laga iibsan karo iyo daawooyinka ka hor.
- Adeeg bixiyaha oo soo dalaca lacagta ballan laga maqnaaday ama ballan la joojiyay iyada oo aysan jirin ogeysiin hore oo 24 saacadood ah.
- Beddelaada qalabka ilkaha oo la lumiyay, maqan, ama la xaday; beddelaada qalabka ilkaha oo waxyeelo soo gaartay oo sababtu tahay iyada loo isticmaalay si xun, si qalad ah, ama dayacaad.
- Beddelaada dib u hagaajinta codka.
- Adeegyada iyo baaritaannada la xiriira ama la tashiyada oo aanan ku jirin qorshaha daaweynta ee la isku qoray ama uusan ku talin oo oggolaanin Willamette Dental Group, dhakhtarka ilkaha ee P.C.
- Adeegyada iyo baaritaannada la xiriira ama la tashiyada oo aan ilaa xad aan lagama maarmaan u ahayn ogaanshaha, daryeelka, ama daaweynta xaalada ku lug leh.
- Adeegyada qof aan ka ahayn dhakhtar ilkood oo ruqsad leh, dhakhtarka ilkaha macmalka ah, ilko nadiifiyaha, ama kaaliyaha ilkaha.
- Adeegyada loogu talagalay ogaanshaha ama daaweynta ciladaha xaglaha kala-goysyada 'temporomandibular', aan ka ahayn in ay ugu qoran yihiin heshiiska in ay yihiin kuwo caymiskooda la daboolayo.
- Adeegyada loogu talagalay daaweynta dhaawac ama cudur caymiskiisa la daboolayo sida ku cad magdhawga shaqaalaha ama ah mas'uuliyada cidda loo shaqeeyo.
- Adeegyada loogu talagalay daaweynta dhaawacyo qofka ku soo gaaray u tababarashada ama u tartanka ciyaaraha fudud.
- Adeegyada loogu talagalay daaweynta dhaawacyo qofku si ku talagal ah iskugu geystay.
- Adeegyada caymiskooda laga heli karo federaalka, gobolka, ama barnaamijyada kale ee dowladeed, iyada oo sharciga oo farayo maahane.
- Adeegyada aan ugu qornayn heshiiska in ay yihiin kuwo caymiskooda la daboolayo.
- Adeegyada halkaasi oo aysan jirin caddeyn ah ogaanshaha cudur 'pathology', cilad jirta 'dysfunction', ama cudur aan ka ahayn adeegyada ka hortagga oo caymiskooda la daboolo.

**XADDIDAADAHA**

- Haddii adeegyo beddel loo isticmaali karo in lagu daweeyo xaalad, adeegyada uu ku taliyay Willamette Dental Group, dhakhtarka ilkaha ee P.C. waa mid caymiskiisa la daboolayo.
- Adeegyada ku qoran heshiisku, kuwaasi oo loo bixiyo in lagu saxo cilladaha ka dhasha dhalashada ama korriinka kuwaasi oo wax u dhimaya shaqada ilkaha iyo qaab-dhismeedka taageeraya ayaa caymiskooda la dabooli doonaa ee loogu talagalay carruurta ku tiirsan haddii baahi ilkood jirto.
- Dib-u-daaweynta buuxinta salka gawska 'root canal' ee uu sameeyo dhakhtarka ilkaha ee Willamette Dental Group ayaa caymiskiisa la dabooli doonaa iyada oo qayb ka ah daaweynta bilawga ah ee 24-ka bilood ee ugu horreysa. Dib-u-daaweynta buuxinta salka gawska 'root canal' ee uu sameeyo adeeg bixiye aan wax ka qayb qaadanayn waxaa dhici doonta in ay khuseeyaan copay-yadu.
- Suuxdin guud waxaa lagu daboolaa copay-yada lagu qeexay heshiiska, haddii: lagu dhex sameeyo xafiiska ilkaha, la bixiyo iyada oo la kaashanayo adeeg caymiskiisa la daboolo, ay ilko ahaan lagama maarmaan tahay iyada oo sababtu tahay ka qayb qaataha oo da'diisu ka yar tahay 17 jir, korriin ahaan naafo ah, ama naafo jireed qaba.
- Adeegyada uu dhakhtar ilkood ku bixiyo goob isbitaal dhexdeeda waa in ay buuxiyaan shuruudaha ku qoran heshiiska si caymiskooda loo daboolo.
- Beddelaada ilko macmal ah oo hadda jira, kabida iliga 'crown', buuxinta iliga gudihiisa 'inlay', buuxinta iliga korkiisa 'onlay', ama qalabka kale ee macmalka ah ee la isu rakibo 'prosthetic' waa mid caymiskiisa la daboolayo haddii qalabku ka weyn yahay 5 sano oo beddelaaduna ilko ahaan lagama maarmaan tahay.
- Kabida ilkaha 'crowns', dib u sameynta ilkaha macmalka ah 'casts', ama dib u hagaajintii kale ee aan tooska ahayn ee wax dib loo dhisay 'fabricated' waa kuwo la daboolo kaliya haddii ay ilko ahaan lagama maarmaan yihiin iyo haddii uu ku taliyo Willamette Dental Group, dhakhtarka ilkaha ee P.C.